

In kastoo saxaafaddu muhiimad leedahay xilliyada lagu guda jiro xasaradaha, misna wariyayaashu waxay weli la kulmaan caqabado ku yimaada caafimaadkooda iyo bad-qabkooda inta uu socdo cudurka COVID-19. NUSOJ waxay ugu baaqeysaa suxufiyiinta iyo xarumaha warbaahinta in ay si iskaashi leh ula tacaalan cudurka COVID-19, iyagoo xaqiijinayo badqabka saxaafad mas'uuliyad ka muuqato.

Despite the importance of journalism during a crisis, journalists continue to face challenges to their health and safety during the COVID-19 epidemic. NUSOJ calls on journalists and media houses to act cooperatively against the COVID-19, by ensuring safe and responsible journalism.

TALOYIN LOOGU TALAGALAY SUXUFIIYIINTA:

- Iskuday inaad waraysi ku qaadid banaanka. Inta aad war tabineyso, fadlan hubi inaad ilaalisid ka fogaanshaha dadka kale, oo ay ku jiraan dadka aad waraysaneyso.
- Sawir qaadayaasha waa iney isticmaalaan kaamirada leh muraayada meel fog wax ka soo dhaweeyso si loo xaqiijiyo masaafada.
- Ila wareedyadu ma aha in khatar loo galiyo inay cudurka qaadaan, Dhammaan xiriirrada waa in lagu sameeyaa dhinaca telefoonka ama khadka internetka sidii suurtagal ah.
- Faafi ama daabac macluumaad la xaqiijiyey oo sax ah keliya. Warbixinnadada ha noqdaan kuwo run ah oo saxan. Yaysan ku hagin warar ku-tiri-ku-teen ah ama macluumaad khaldan.
- Ka xaqiiji macluumaadka laba ilood ka hor intaadan daabicin ama faafin si looga hortago faafitaanka macluumaad khaldan iyo khal-khal.
- Inta aad ka warbixinaysid dadka cudurka qabo, xafid xogtooda u gaarka ah. Ha takoorin qof cudurka qaba.
- Dhinaca jinsiga (lab ama dhidig) ayaa loo baahan yahay in la qaddariyo marka la tabinayo ama faafinayo macluumaadka ku saabsan COVID-19.

TALOYIN LOOGU TALAGALAY XARUMAHA WARBAAHINTA:

- Xarumaha warbaahinta waxaa lagula talinayaa in ay maareeyaan sidii guryaha looga shaqeyn lahaa si loo yareeyo fursadda ay saxafiyiinta ay ku qaadi karaan cudurka ama uu ku faafi karo.
- Xarumaha warbaahinta waxaa lagula talinayaa inay siiyaan suxufiyiinta qalabka loo baahan yahay inay isku badbaadiyaan iyo talaabooyin ay isku difaacaan.
- Xarumaha warbaahintu waa inay mudnaanta siiyaan tabinta warbixin xaqiiqo ah. Ku tartamida wararka deg-degta ah yaan la dhiira gelin si loo yareeyo faafitaanka macluumaad khaldan.
- Xarumaha warbaahinta waa inay wakhtigooda ku siiyaan saxafiyiinta mushaarkooda bilaha ah oo buuxa iyo tas-hiilaad caafimaad.

ADVICES FOR JOURNALISTS:

- Try to conduct interviews out of doors. While reporting, please ensure that you maintain your distance from others, including interviewees.
- Photographers should use longer lenses to ensure distance.
- Sources should not be put at risk of infection. All contacts should be carried out by phone or online where possible.
- Disseminate or publish verified and authentic information only. Keep reports truthful and accurate. Do not be guided by hearsay or misinformation.
- Verify information from two sources before publishing or disseminating to prevent spread of misinformation and panic.
- While reporting about the affected people, maintain confidentiality. Do not discriminate against an infected person.
- Gender dimension needs to be considered while reporting and disseminating information on COVID-19.

ADVICES FOR MEDIA HOUSES:

- Media houses are advised to manage "work-from-home" to minimise the chance of the journalists contracting or spreading the virus.
- Media houses are advised to provide journalists with the necessary safety equipment and protective measures.
- Media houses must prioritise factual reporting. Competition of breaking news is discouraged to minimise the spread of misinformation.
- Media house should provide journalists timely and full monthly remuneration and medical facilities and moral support.